



Caddaynta koodka QR ee la cusboonaysiiyay ee tallaalka oo buuxiya heerarka lagu taliyay ee Kanada ee ku saabsan safarka ayaa hadda laga heli karaa alberta.ca/CovidRecords.

Kadib markaad buuxiso xogtaada, hubi inaad "kaydiso diiwaankaaga" PDF ka kooban diiwaanka koodka QR ee saxa ah.

Noocyada dijitaalka ah iyo kuwa daabacan waa ansax. Noocan iyo kii hore ee (QR code) labadaba waxa lagu isticmaali karaa meheradaha Alberta. Uma baahnid diiwaanka la cusboonaysiiyay ilaa aad safrayso mooyee.

Haddii aad u baahan tahay diiwaan daabacan, waxaad ku heli kartaa mid lacag la'aan markaad booqato wakiilka diiwaanka ama wac Khadka Caafimaadka (Health Link) 811. Si aad caawin u hesho soo dejinta, fadlan booqo alberta.ca/CovidRecordsHelp.

Ganacsiyada waxa laga yaabaa inay u baahdaan inay cusboonaysiiyaan Codsiga Hubinta Diiwaanka Koofid ee Alberta (AB Covid Records Verifier) si ay u akhriyaan koodka la cusboonaysiiyay. Waxaad ku hubin kartaa haddii aad haysato noocii ugu dambeeyay ee codsiga adiga oo aadaya Google ama Apple. Haddii diiwaanka wali muujinayo inaanu ansax ahayn marka la sawiro cusboonaysiinta ka dib, tirtir codsiga ka dibna mar kale soo degso.